qofka dhinta isagoo baryaya cid aan Ilaahay ahayn Naartuu gelayaa

Cabdullaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: kalimad ana mid ayaan iri, Nabigaa yiri nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee: " qofka dhinta isagoo baryaya cid aan Ilaahay ahayn Naartuu gelayaa," ana waxaan iri: qofka dhinta isagoon baryeyn cid aan Ilaahay ahayn Janaduu gelayaa.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu inoo sheegay in Qofkii u leexiya Cibaado Ilaahay leeyahay cid isaga qayrki ah, sida baryada Ilaahay qayrki la baryo, ama cidaan Ilaahay ahayn oo loo qayshado, ee sidaa ku dhinto Naarta ayuu gelayaa. Ibnu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ku siyaadiyey qofka dhinta isagoon Ilaahay cidna ugu shariig yeelin, kaasi wuxuu ku dambaynayaa Janada.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3419